


# Kitaabka Quduuska ah ee loogu talo galay Carruurta Soo-jeedinayaa



## Nuux iyo Daadkii Weynaa

Waxa qoray: Edward Hughes

Waxa Tusaaleeyay: Byron Unger; Lazarus

Waxa tarjumay: Zemendale Translation Service

Waxa dhaqan-geliyay: M. Maillot; Tammy S.

Qisada 3 ee 60

[www.M1914.org](http://www.M1914.org)


*Bible for Children, PO Box 3, Winnipeg, MB R3C 2G1 Canada*

Liisan: Waxaad xaq u leedahay inaad koobiyayso ama daabacato qisadan, in alla inta aanad ka iibinaynin.

Somali


Nuux waxa uu ahaa nin Ilaah caabuda. Qof walibana isaga wuu nacay oo waxay dadku caasiyeen Ilaah. Maalin aya dabbeenta, Ilaah waxa uu isaga u

sheegay arrin naxdin leh.



1

Ilaah wuxuu Nuux u sheegay "Dhulka waxaan ka baabi'in doonaa dulmi falayaasha." Waxa kaloo Ilaah isaga ku yidhi, "Qoyskaaga oo keliya ayaan badbaadin doonaa."



2

Ilaah wuxuu Nuux u sheegay inuu iman doono daad weyn oo qarín doona dhulka oo dhan.



3

Nuux waxa lagu amray, "Dooni ka samayso qoryo loox ah, oo ha noqoto mid ku filan qoyskaaga iyo xayawaan faro badan!"




4

Ilaah waxa uu Nuux u sheegay sidii uu wax u samaysan lahaa, oo Nuuxna arrintaas ayuu ku mashquulay!



5


Markii Nuux uu ka waramay sababta uu doonta u samaysanayo waxa dhacday



6

in dadkii ay isaga ku majaanjilloodeen. Nuux laakiinse wuxuu iska sii watay samayntii doonta.

Sidoo kale wuxuu dadka u sheegayay waxyaalaha Ilaah ku saabsan,



7

balse cidina may dhegeysanin hadalkiisa.

Nuux waxa uu lahaa iimaan weyn. Waxa uu rumaystay Ilaah in kasta oo wakhtigaas wax roob ahi aanu hore u di'in.




8

Si dhakhso ahna doonnidii waxa ay diyaar u ahayd in la raro.




9

Waxa haddaba imika yimid xayawaankii. Ilaah waxa uu keenay noocyada xayawaanka oo mid walba lab iyo dhedig ah.



10

Shimbiro waaweyn iyo kuwo yaryar, dugaag yaryar, iyo kuwo dhaadheer dhammaantood waxa ay soo galeen doonnidii.



11

Waxa laga yaabaa in dadku ay ku qaylinayeen oo caayayeen Nuux markii uu xayawaanka ku gurayay doonnida.



12


Waxa dhacday in aanay denbaabitaankii ay Ilaah ku denbaabayeen aanay joojinnin. May odhanin aannu soo galno doonnida.



13


Ugu danbayntii, xayaawaankii iyo shimbirihii waxa ay fuuleen doontii. Ilaahna waxa uu Nuux ku yidhi, "Soo gal doonnida adiga iyo dadka gurigaaguba."

14



Dabeetana,  
Nuux iyo  
naagtiisii  
iyo saddexdiisii  
wiil iyo naaghoodii  
waxa ay galeen doonnidii.  
Oo Ilaahna waxa uu dabeeto  
xidhay albaabkii doonnida.

15




Waxa  
kaddibna soo  
da'ay roobkii.  
Waxa dhulka oo dhan qariyay  
roob xooggan muddo gaadhaysa  
afartan cisho iyo afartan habeen.

16




Biyihii daadka ahaa waxa ay qariyeen  
magaalooyinkii iyo xaafadihii.

17




Markii roobku  
dhammaadayna, xitaa buuraha  
waxa qarinaayay biyo. Wax kasta  
oo noole ahaana waa uu dhintay.

18



Markii biyuhu ay  
burqanayeen, doonnidu waxay  
dul sabbaynaysay biyaha  
korkooda. Waxa laga yaabaa  
doonnida gudeheedu inuu  
ahaa mugdi, waxa laga yaabaa  
inay ahayd meel laga cabsado.  
Laakiinse doonnidu waxa ay  
Nuux ka ilaalisay daadkii.


19



Markii muddo shan bilood ah  
daadku soconayay, Ilaah waxa uu  
soo diray dabayl wax qallajisa.  
Dabeetana doontii waxa ay ku si  
tartiib ah uugu dul fadhiisatay  
buuraha  
Araarad.


20






Nuux waxa uu doonnida gudeheedii kusii jiray muddo gaadhaysa afartan cisho markii ay biyuhu yaraadeen.

21




Nuux waxa uu diray tuke iyo qoolley oo ka baxay daaqadda doonnida. Markii qollaydii ay weyday meel engegan oo ay ku dul fadhiisato, waxa yay dib uugu soo noqotay Nuux.

22




Muddo toddobaad ah dabadeed, Nuux mar kale ayuu haddana tijaabiyay. Qollaydii waxa ay markan lasoo noqotay iyadoo afka ku sidda caleen saytuun oo qoyan.

23




Usbuucii xigayna Nuux waxa uu ogaaday inuu dhulku engaganyahay waayo qollaydii dib uuguma soo noqon isaga.

24



Ilaah wuxuu Nuux u sheegay inay gaadhay wakhtigii uu kasoo bixi lahaa doonnida. Si wada jirana, Nuux iyo qoyskiisii waxa ay u dejiyeen xayawaankii.

25



Sidee haddaba Nuux uu arrintaas uuga mahad celin lahaa! Waxa uu dhisay meel allabari oo waxa uu caabuday Ilaahii isaga iyo qoyskiisaba ka badbaadiyay daadkii aadka u darnaa.

26

Ilaah  
waxa uu  
Nuux siiyay  
ballanqaad  
cajiib leh.

Waxa uu sheegay  
inaanu mardanbe  
dunida kusoo dayn  
doonin daad si uu  
denbiyadooda uugu  
ciqaabo.

27

Waxa  
uu Ilaah  
ballanqaadkiisa  
u sameeyay wax  
lagu xasuusto.

Jeegaanta ayaa  
waxa ay ahayd  
calaamadda u  
taagan ballanqaadka  
Ilaah.

28

Nuux iyo reerkiisii  
waxa ay heleen  
bilow cusub daadka  
dabadiis. Muddo  
dabadeedna,  
farcankiisii  
waxa

ay dib u  
cammireen dhulka.

29

Quruumaha  
dunida ku nool  
oo dhammina waxa  
ay ka yimaaddeen  
Nuux iyo carruurtiisa.

30

Nuux iyo Daadkii Weynaa

Qiso ka ahaatay Ereyga Ilaah,  
Kitaabka Quduuska ah,

waxa laga helayaa

Bilowgii 6-10

"Erayadaada furniinkoodu wax buu  
iftiimiya." Sabuurka 119:130

**Ilaah wuxuu ogsoonyahay** inaan samaynay waxyaalo  
xunxun, kuwaas oo uu ku magacaabo denbi. Ciqaabka  
denbiguna waxa weeyi dhimasho.

**Ilaah si aada ayuu inoo jecelyahay** waxaanu soo diray  
Wiilkiisa, Ciise, si uu ugu dhinto Iskutallaab korkeeda  
una bixiyo qaanta denbiyadeenna.

**Haddaad rabo inaad kaso laabato xad-gudubyadaada,**  
sidan ku dhex Ilaah: Ilaahaygii weynaayow, waxaan  
rumaysanahay inuu Ciise u dhintay aniga aawaday isagoo  
haddana nool. Fadlan ii kaalay oo iga cafi denbiyadayda,  
si aan imika u helo nolol cusub, oo aan adiga weligaa kuula  
jiro. Igu caawi inaan adiga awгаа u noolaado anoo ka  
dhigan ilmahaaga. Aamiin. Yooxanaa 3:16

**Akhri Kitaabka Quduuska ah oo  
maalin walba Ilaah la hadal!**